# WARSIDAHA AGA
## AGA NEWSLETTER

**Waa Warside-Xilliyeed ku Hadla Codka Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA)**
***A Periodical Newsletter Published by the Intergovernmental Academy of Somali Language***

**Tirsiga 2aad, sannadka 1aad Abriil- Juun 2018**


## HADAFKAYAGU WAA HIILKA AFKA HOOYO IYO HAL-ABUURKIISA

# Warsidaha AGA

***Ku soo dhowaada tirsiga 2aad ee warsidaha AGA!***

Warsidaha AGA waa warside-xilliyeed ay soo saarto Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu (AGA), oo idiin soo gudbiya aqoon isugu jirta xog-wadaag, aqoon-wadaag iyo talo-wadaag.

Warsidahan ujeeddooyinka loo aasaasay waxaa ka mid ah in uu ehelada afka, hal`abuurka, dhaqanka, qoraalka iyo aqoon-faafinta ee daafaha dunida kala jooga la socodsiiyo hawlaha iyo dhaqdhaqaaqyada muhiimka ah ee ku saabsan arrimaha kor ku xusan iyo aqoon-kobcin la xiriirta isla arrimahaas. Warsiduhu wuxuu ururiyaa, kaydiyaana dhacdooyinka muhiimka ah iyo waxqabadka arrimaha kore.

Wixii ah fikrado iyo talobixin ku saabsan sii hagaajinta, hannaaninta iyo horumarinta warsidahan aad ayaan u soo dhoweynaynaa. Sidoo kale, gacmo furan ayaan ku soo dhowaynaynaa wararka iyo qoraallada ay soo gudbiyaan qalinleyda iyo ehelada Af-Soomaaligu,.

***Warsidahani wuxuu ku soo baxaa nuqul daabacan iyo mid elektoroonig ah.***
***Cinwaanka lagala soo xiriirayaa waa***
***Email: info@aga.so***

## "Afkaagu Waa Aqoonsigaaga"




# XUSKA MAALINTA CAALAMIGA EE AFKA HOOYO

# Tusmada Tirsigan

---------------------------


**Ereyga Tifaftirka 2-aad**

**AGA iyo Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo**

---------------------------------------------

**Qormooyin Hortabin Mudan**
**Milicsi Kooban Waxqabadkii AGA ee Sannadkii 2017 3-aad -4-aad**

**WARARKA WAXQABADKA AGA**
**Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo oo Muqdisho lagu Qabtay 5-aad**
**Magaalooyinka Soomaalida oo Xusay Maalinta Afka Hooyo.**
**Maalinta Afka Hooyo oo lagu Qabtay Yurub iyo Maraykan 6-aad**
**MADASHA AGA OO LAFAGUR KU SAMEYSEY BUUGGA EE HABEEN EERSI 7-aad**

**WARAR KALE OO XUSID MUDAN**
**SomaliPen oo xus iyo xusuus u samaysay qoraa Cabdiraxmaan Xuseen Samatar 8-aad**

---------------------------------------------

**KORORSO AQOONTA AFKAAGA IYO HAL ABUURKIISA 9-aad**
**Dhismaha Naxwaha Af Somaaliga WAA MAXAY SUUGAAN? 10-aad**

---------------------------------------------

**MURTI: HODANTINIMADA AFKAAGA HOOYO 11-aad**


---------------------------------------------


**GOOSANKA TIFAFTIRKA**

**Tifaftiraha Sare:**
Mustafa Cabdullaahi Fayruus
Agaasimaha:
Axmed Maxamuud Dhicisow

**Agaasimaha Farsamada:**
Axmed Faarax Saalax
Kaaliyah Farsamada
Amiin Yuusuf Khasaaro

**Xubnaha tifaftirka**
Cabdiraxmaan Abtidoon
Cabdullaahi Cabdi Gacanka
Saynab Daahir
Saynab Xaaji Axmed



**Waxaad kala xiriir kartaa :**
Email: Info@aga.so
Facebook: @Akadeemiye Goboleedka Afsoomaaliga
Twitter: @somaliacademy
Website www.aga.so

# EREYGA TIFAFTIRKA

## AGA iyo Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo: Diiradda Tirsigan

Tirsigan labaad ee Warsidaha AGA waa tirsi gaar ah oo xooggiisa diiradda lagu saarayo xog-warran ku saabsan xaflado tiro badan oo loogu damaashaaday xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo ee sannadkan 2018. Xafladahaas waxaa qabanqaabadooda hormuud ka ahaa Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA) Xarunteeda Dhexe iyo laamaha iyo wakiillada ay ku leedahay magaalooyinka waaweyn ee Soomaaliya, Geyiga Soomaalida ee Geeska Afrika iyo daafaha dunida.

.

21ka (Febraayo) waa maalinta adduunweynuhu u aqoonsaday *Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo,* ka dib markii quruumaha dunida ee ku midaysan madasha Qarammada Midoobay ay go'aankaas isku reaaceen sannadkii 1999. Laga bilaabo sannadkii 2000, inta badan waddannada aduunka waxaa laga dhigaa damaashaad maalintaas looga dhiganayo fursad dadka lagu abaabulo, laguna wacyigeliyo qiimaha uu qolo walba ugu fadhiyo afkooda hooyo, iyadoo qolo kastaa xoogga saarayso afka ay iyagu leeyihiin. Sidaa si la mid ah, Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu ilaa markii la aasaasay (sannadkii 2013), sannad kasta marka la gaaro bishiisa labaad, waxay dadaal weyn gelinaysay qabanqaabinta munaasabad qaayo leh oo waxgaradka lagu kulmiyo fagaare wadareed oo dadka lagu baraarujinayo qiimaha uu ku fadhiyo afkeenna hooyo

, AfSoomaaligu, iyo sida loogu baahan yahay in loo gurmado ilaalintiisa iyo horumarintiisa; taas oo ah himilada ugu weyn ee ay u taagan tahay Akadeemiye-Goboleedkani.

Haddaba, sidii ay samayn jirtay sannadihii hore ee uu ugu dambeeyey sannadkii tegay ee 2017, Akadeemiye-Goboleedkan xarunteeda Dhexe iyo laamaheeda kala duwani waxay ku guulaysteen abaabulka xaflado xiise badan oo la isugu yeeray ehelada afka iyo aqoonta ee kala jooga magaalooyinka iyo wadammada kala duwan ee ay ka hawlgasho AGA. Munaasabaddii 21 Febraayo ee sannadkan, sida kii ka horreeyeyba, AGA iyo wakiilladeedu waxay damaashaad noocaas ah hormuud ka noqdeen xaflado ka dhacay in ka badan 13 magaalo oo ku kala yaal saddexda qaaradood ee kala ah Afrika, Yurub iyo Ameerikada Waqooyi, magaalooyinkaas oo ay ka mid yihiin: Muqdisho, Baydhabo, Hargeysa, Garoowe, Gaalkacyo, Jabuuti, Jigjiga, Nayroobi, London, Bristol (UK), Oslo (Norway), Helsinki (Finland), Huge (Holland), Stockholm (Sweden), Minneapolis (USA), ikk. Xusid gaar ahaaneed waxaa mudan in saddexda qaaradood ee kala duwan xuska maalintaas lagu wada halqabsaday halkudheg midaysan oo ay hore ugu wada heshiiyeen bahda AGA. Mar qudha ayay maalintaas ku wada dhawaaqeen halkudheggii sannadka 2018 oo ahaa: *"Afkaagu Waa Aqoonsigaaga."* Kii sannadkii horena wuxuu ahaa "*U hiilli Afkaaga Hooyo*!"

Haddaba, iyadoo ujeedku yahay in la diiwaangeliyo isla markaana lala socodsiiyo akhristeyaasha dhacdooyinkaas waxtarka weyn u leh hiilka afkeenna hooyo, ayaan tirsigan u doorannay in uu noqdo tirsi gaar ah oo diiradda saaraya wixii ay Akadeemiye-Goboleedku qabatay maalintaas taariikhiga ah. Tirsigani wuxuu xambaarsan yahay warbixinno si gooni-gooni ah ama kala is ah looga xog-warramayo madal kasta sidii wax u dhaceen iyo guusha laga soo hooyay. Waxaa weheliya soo koobid gaaban oo laga soo qaatay warbixinta waxqbadkii AGA ee sannadkii hore, 2017, dhawr qoraal oo ku saabsan AfSoomaaliga iyo suugaantiisa iyo dheegag kooban oo lagu tusaalaynayo hal-abuurka suugaaneed ee Soomaalida.

Akhris wanaagsan!






## QORMOOYIN HORTABIN MUDAN

# Milicsi Kooban Waxqabadkii AGA ee Sannadkii 2017

Waa dhaqan iyo caado adduunka ka jira in sannad kasta marka uu idlaado in dib loo milicsado hadba waxii dhacdooyin ah ee laga dhaxlay sannadkii tegey.
Xusuus ahaan sannadkii tegey ee 2017, Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga AGA waxa uu u ahaa mid ay wax badan u qabsoomeen, xusuus togane ahna ku reebay. Haddii aan dib u jaleecno maalmihii sannadkaasi waxaa Akadeemiye-Goboleedka AGA u qabsoomay hawlo baaxad leh oo isugu jiray qabashada xusas caalami ah, qabashada tababaro baahsan, dardargelinta iyo u-ololaynta u hiilinta Af Soomaaliga iyo ka-dhaadhicinta arrintan madaxda Soomaaliyeed, abaabulida kulamo ku saabsanaa bulshayn iyo soo dhowayn, ku baraarujinta shacabka Sooomaaliyeed ahmiyadda uu leeyahay afkooda hooyo, la kulanka hay'adaha gacansaarka la leh AGA, samaynta muxaadarooyin ku aadanaa daryeelka afkeena hooyo, iyo shaqooyin kale oo muhiim ahaa.
Fulinta iyo meel marinta qorshe-hawleedyadii u yiillay ayay Akadeemiye-Goboleedku bilowgii sannadkaba ku dhaqaaqday. Kulankii ugu horeeyay waxa uu goosanka AGA u qabsoomay 2 Jannaayo 2017. Kulankaasi oo ka dhacay xaruntii kmg ahayd ee AGA ee Magaalada Muqdisho waxaa shir guddoominayay Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka Dr. Maxamed Daahir Afrax. Kulankaas waxaa la isla qiimeeyay waxqabadkii AGA ee sannadki 2016, qorshe-hawleedkii u yaallay waxa u qabsoomay iyo wax aka baaqday, iyo sababaha baaqashada keenay. Sidoo kale, waxaa la isla jeexjeexay sidii loo dardar gelin lahaa hawlaha Akadeemiye-Goboleedka hor yaalla sannadkii cusbaa ee 2017.
Guddoomiyaha AGA Dr. Maxamed Daahir Afrax waxa uu dhambaal hambalyo ah uu u diray 12 Febraayo Madaxweynaha Dawladda Federaalka Soomaaliya Md, Maxamed Cabdullaahi Farmaajo; waxa uu ugu hambalyeeyay masuuliyaddaa loo doortay, isagoo u rajeeyay inuu Ilaahay la garabgalo xilkaa culus ee loo doortay.
Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu waxay qabanqaabisay 21 Febraayo xaflado taxane ah oo si weyn loo soo agaasimay, oo lagu maamuusayay 'maalinta caalamiga ah ee afka hooyo' [21 Febraayo]. Xafladahan waxaa ibofur u ahayd xafladdii lagu qabtay Muqdisho 21 Febraayo, oo Akadeemiye-Goboleedka AGA ay iska kaashadeen Akadeemiyada Cilmiga, fanka iyo Suugaanta iyo Golaha Abwaannada Soomaaliyeed. Xafladdan Muqdisho ka sokow, waxaa xafladu ballaaran lagu qabtaya magaalooyinka kale ee ku yaal Soomaaliya iyo guud ahaanba Geyiga Soomaaliyeed ee Geeska Afrika. Xafladahan waxaa ka soo kala qayb galay wasiirro, xildhibaanno iyo masuuliin kaleba, xeeldheerayaal afka iyo marti sharaf kale.

Waxaa xigay xaflado taxnaa muddo toddobaad ah, 23-28 Febraayo, oo lagu qabtay magaalooyin kala duwan oo caalamka ah. Xafladahan oo ay soo qbanqaabiyeen laamaha AGA ee qurbaha, waxaa ka soo qaybgalay jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Qurbaha. Xafladhani iyo maamuuska maalintani dhadhan gaar aha ayay u lahayd jaaliyadaha qurbaha.
Abaabulka xafladahan taxanaha ah iyo iskudubbaridka hawlahaas waxaa ammaan gaar ah ku leh 'Guddiga Qabanqaabada Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo', oo uu hawshan u magacaabay Guddoomiyaha AGA 09 Jannaayo 2017.
Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu waxay dadaal ku bixisay sidii madaxda iyo masuuliinta Soomaaliyeed kaalin muuqata ka qaadan lahaayeen u hiilinta afka hooyo.
Guddoomiyaha AGA Dr. Maxamed Daahir waxa arrintan kala kulmay guddoomiyaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi 23 Febraayo, waxaana uu kala hadlay sida ugu haboon ee Aqalka Sare kaalintiisa uga qaadan lahaa daryeelka afka Soomaaliga.
Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga iyo Golaha Abwaanada Soomaliyeed ayaa 09 Maarso si wadajir ah u soo saaray qoraal ay madaxda saree e Dawladda Soomaaliya kaga codsanayeen in la dhiso wasaarad ka shaqaysa afka, dhaqanka iyo hiddaha. Codsigan waxaa lagu hagaajiyay Madaxweynaha Soomaaliya iyo Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya oo xilligaasi ku guda jiray dhisiddii Golaha Wasiirada.
Mirihii ugu horreeyay ee dadaalkan ka dhashay, Ra'iisal Wasaaraha Soomaaliya Md, Xasan Cali Kheyre ayaa soo saarey Wareegto 3 Abriil uu ku amrayo Wasaaradaha Dawladda iyo Hay'adaha Qaranku inay ku shaqeeyaan afka Soomaaliga.
Guddoomiyaha AGA waxa uu xafiiskiisa ku booqday Wasiirka Waxbarshada Md, Cabdi Daahir 17 May, waxaana ay isla meel dhigeen sidii la isaga kaashan lahaa kobcinta kaalinta Af Soomaaliga.
Si loo qiimeeyo hawlaha AGA ee rubuc-sannadeedkii 1aad, goosanka AGA ee Muqdisho waxay 18 Maarso isugu yimaadeen kulan ballaaran; waxay qiimayn kooban ku sameeyeen shaqadii saddexda bilood ee la soo dhaafay, waxayna isla meel dhigeen sidii loo dardargelin lahaa hawlaha bilaha soo socda.
Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, oo kaashanaysa 'Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta' iyo Golaha Abwaannada Soomaaliyeed, waxay qabatay xaflad lagu maamuusayay 'Maalinta Caalamiga ah ee Buugga' 23 Abriil; waxaana ka soo qaybgalay qorayaal, aqoonyahanno, bahda waxbarashada, sidoo kale masuuliin kala duwan iyo marti sharaf kale. Hawshan qabanqaabadeeda waxaa dusha u ritay guddiga gaar ah oo Guddoomiyaha AGA u magacaabay 12 Abriil.

# Milicsi Kooban Waxqabadkii AGA ee Sannadkii 2017

Dhinaca kale, guddoomiyaha AGA waxa uu ka qayb galay 27 May munaasabad lagu xusayay gurmadkii Dawladda Jabuuti iyo dadaalkii Ismaaciil Cumar Geelle ee uu ku badbaadinayay Ummadda Soomaaliyeed sannadkii 2000. Munasabadaasi oo aad u qiimo badnayd waxaa lagu soo bandhigay nafhurnimadii uu Madaxeweyne Geelle u soo galay shacbiga Soomaaliyeed.

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu waxay tababar ah 'Fanka Qoraal Curinta' ugu qabatay hal-abuurka soo koraya Magaalada Garoowe 7 Luulyo. Tababakaasi oo uu hogaaminayay Gudoomiyaha AGA Dr. Maxamed Daahir Afrax ayaa waxaa kala soo qeyb galay agaasimaha Scansom md Saciid Maxamed Sheekh iyo masuuliyiin kale.

Akadeemiyada AGA waxay 11 Luulyo kulan isugu jiray qado sharaf iyo soo dhoweyn ay u samaysay Macallin Saciid Saalax Axmed oo Muqdisho booqasho ku yimid. Macalin Saciid waxa uu ka mahadceliyay sida diiran ee loo soo dhoweeyay.

Bandhigii Buugaagta Garoowe waxa uu ka dhacay magaalada Garoowe 17-19 Luulyo. Munaasabaddii furitaanka bandhiggaasi waxaa ka qayb galay guddoomiyaha AGA, kana jeediyay hadal uu kaga hadlay qiimaha ay leeyihiin qoraalka buugaagta iyo faa'iidada akhriska iyo qoraalka, isagoo bulshada ku dhiirrigeliyay sidii ay sare uga qaadi lahaayeen aqoontooda.

Laanta Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ee Dalka Ingiriiska ayaa 20 Luulyo ku qabtay dalkaasi kulan looga hadlayay sidii bulshada Soomaaliyeed ee qurbaha ku dhaqan loogu dhiirrigelin lahaa ilaalinta afkooda hooyo, kulankaasi oo ku dhacay jawi aad u sareeya waxaa ka hadlay Prof Cabdiqaadir Ruumi Abuukar iyo Aamino Muuse Wehliye oo labbaduba ka tirsan masuulyiinta AGA ee Dalkaasi Ingiriiska.

Sidii caadadu ahaydba, goosanka Xarunta AGA ee Muqdisho waxay 5 Agoosto isugu yimaaddeen kulan ay ku gorfaynayeen hawlaha AGA ee muddadii la soo dhaafay, sidoo kalena waxay ka wada hadleen dardargelinta hawlaha AGA muddada sannadka 2017 ka dhiman.

12 Agoosto AGA waxay tababar heerkiisu sareeyo ay u qabatay qaar ka tirsan dhallinyarada Soomaaliyeed ee daneeya hal-abuurka qalinka. Tababarkaasi oo lagu qabtay xarunta Ifiye ee Magaalada Muqdisho waxaa casharo ku saabsan dhinaca hal-abuurka ka soo jeediyay Dr. Maxamed Daahir Afrax iyo Prof. Mustafa Fayruus.

Heshiis is-afgarad iyo wada shaqayn ah ayaa dhexmaray Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga iyo Wasaaradda Warfaafinta 27 Agoosto. Waxaa la isla meel dhigay sidii loogu bahoobi lahaa daryeelka afka Soomaaliga. Kulanaasi oo ka dhacay xarunta Wasaaradda Warfaafinta ayaa dhinaca Akadeemiye-Goboleedka waxaa hogaaminayay Guddoomiye Afrax halka dhanka Wasaaradda Waraafintana waxaa hogaaminayay Agaasimaha Guud Cabdiraxmaan Al-Caddaala, oo ay wehelinayeen Agaasimaha Telefishanka Qaranka Liiban Cabdi Cali iyo Agaasimaha Raadiyo Muqdisho Cabdifitaax Jeyte.

Akadeemoiye-Goboleedka AfSoomaaliga oo kaashanaysa xarunta Aw Jaamac Cumar Ciise ayaa 09 Sebtembar Magaalada Nairobi waxa ay ku qabatay kulan cilmiyeed looga hadlayay xoojinta iyo noolaynta afka hooyo. Kulankaasi oo aad u xiiso badnaa waxaa ka soo qeyb galay aqoonyahanno, waxagarad iyo xubno ka mid ah bulshada Soomaaliyeed ee ku nool Dalka Kenya. Mowduucii kulan cilmiyeedkaasi waxa uu ku saabsanaa sida isaga kaashan karo daryeelka afka iyo dhaqanka Soomaalida.

Bandhigga Buugaagta Muqdisho ayaa Muqdisho lagu qabtay Sebtembar 2017. Bandhiggaasi oo muddo saddex cisho ah ka socday Magaalada Muqdisho ayaa aqoonyahanadii ka hadlay waxaa ka mid ahaa Gudoomiyaha AGA Dr Maxamed Daahir, oo 13 Sebtembar hadal ka jeediyay kaga hadlay taariikhda iyo heerarka ay soo martay qoraalka farta Soomaaliga.

Akadeemiaye-Goboleedka AfSoomaaliga waxa ay 20 Sebtembar casho sharaf ugu samaysay Magaalada Muqdisho qorayaal caan ah oo ka tirsan Akadeemiyada iyo hawlwadeeno gacansaar la leh AGA oo ka soo qayb galay bandhigii buugaagta Muqdisho. Munaasabadii casho sharaftaasi oo si qurux badan loo soo agaasimay ayaa waxaa ka dhex muuqday qoraaga weyn Axmed Faarax Cali (Idaajaa).

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga waxay 23 Novembar qabatey kulan aqooneed ku saabsanaa 'Turxaan Bixinta Adeegsiga AfSoomaaliga iyo Tayeynta Erayga Qoran'. Munaasabaddii kulan aqooneedkaasi waxaa ka soo qeybgalay guddoomiyaha AGA Dr. Maxamed Daahir Afrax, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta Cabdiraxmaan Yuusuf Al-caddaala, Agaasimaha Waaxda Dhaqanka ee Wasaarada Tacliinta Sare Dr Cabdishakuur Sheekh Xasan iyo madax kale. Kulan aqooneedkaasi waxaa ka faa'iidaysteen in ka badn 50 xubnood oo ka kala socday naadiyada Akhriska, bahda waxbarashada iyo saxaafadda.

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu waxay sannadkii 2017 ku gunaanaday daahfurka kulan aqooneed joogto noqon doona, oo AGA si joogto ah u qabanqaabin doonto; waa 'Madasha AGA' oo la daahfuray 28 Diisambar; looguna talagalay horumarinta Afka Hooyo iyo hal-abuurkiisa.

Intaasi waa milicsi kooban oo aan ku samaynay qaar ka mid ah hawlihii Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga u qabsoomay sannadkii 2017.

*Dhammaad*

## WARARKA WAXQABADKA AGA

# Xuska Maalinta Caalamiga ah e Afka Hooyo oo Muqdisho lagu Qabtay

Munaasabad si qurux badan loo soo agaasimay, laguna maamuusayay Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo, ayaa Muqdisho lagu qabtay 21 Febraayo 2018. Xafladdan waxaa soo qabanqaabisay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga oo kaashanaysa Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta iyo Golaha Abwaannada Soomaaliyeed.




Furitaankii munaasabaddan oo uu ka hadlay guddoomiyaha Akadeemiyadda Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta mudane Cabdiqaadir Nuur Xuseen (Maax) ayaa hoosta ka xarriiqay sida loogu baahan yahay in munaasabaddan laga dhigo mid qaran, dawladduna qabanqabadeeda xil isaga saarto sannad kasta.

Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga Dr..Maxamed Daahir Afrax oo khudbad dhinacyo badan taabanaysay ka soo jeediyay goobta, ayaa si faahfaahsan uga warramay sidii uu ku yimid xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo. Waxaa kale oo uu tilmaamay in laamaha AGA ee gobollada Soomaaliya, Geeska Afrika iyo daafaha dunida, intuba in ay magaalooyin badan isla maanta ku qabanayaan xafladdan oo kale. “Sannadkan halkudhegga la isla wada qaatay waa ‘Afkaagu waa aqoonsigaaga’” ayuu yiri Dr Afrax.

Dr. Afrax wuxuu xusay Magaalada Jabuuti in ay ahayd meeshii ugu horreysey geyiga Soomaalida ee laga bilaabay xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo, sannadkii 2006. “Waxay ku bilaabatay hindise aan la wadaagay Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle 12/10/2005, ka dibna madaxweynuhu soo dhoweeyay, amarna ku bixiyay in sannad kasta munaasabaddaas Jabuuti heer qaran looga dabbaaldego” ayuu yiri Dr Afrax, oo sii raaciyay “halkaas ayaa munaasabaddan lagu daahfuray bandhig-dhaqameed baaxad weyn oo lagu magacaabay ‘Toddobaadka Afka Hooyo’”.

Mahadcelin aad u ballaadhan ayuu guddoomiye Afrax u jeediyey Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, sida joogtada ah ee uu goor walba heegan ugu yahay hiilka afka hooyo. Waxaa kale oo guddoomiye Afrax mahadcelin iyo bogaadin u jeediyay Ra’iisalwasaare Xasan Cali Khayre, asagoo uga mahadceliyey hiilka la taaban karo oo uu isku garab taagey afkeenna hooyo iyo Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga.

Xafladan waxaa isna hadal qiime leh ka soo jeediyay Ra’iisal Wasaaraha Soomaaliya Md Xasan Cali Kheyre, oo ku nuuxnuuxsaday in Xukuumaddiisu isu taagayso daryeelka afka hooyo; isagoo cid kastana ugu baaqay in ay xil gaar ah iska saarto daryeelka afkeenna hooyo.

Ra’iisal wasaaraha waxa uu si gaar ah ugu mahadnaqay guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, Dr. Maxamed Daahir Afrax, sida hagar la’aanta ah ee uu had iyo goor ugu taagan yahay daryeelka afkeena hooyo iyo u hiillintiisa.

Gudoomiyaha Aqalka Sare ee Dawladda Federaalka Soomaaliya Md Cabdi Xaashi Cabdullaahi oo munaasbadaasi soo gunaanaday ayaa sheegay inuu ku faraxsanyahay sida quruxda badan ee loo soo agaasimay xuska munaasabadan.; waxaana uu tilaamay in loo baahan yahay in dadaalka loogu hiillinayo afka iyo dhaqanka in la labanlaabo.

Munaasabaddan waxaa ka soo qaybgalay dadweyne fara badan oo ka kala socday naadiyada akhriska iyo qoraalka, bahda afka iyo dhaqanka, bahda waxbarashada, abwaanno, haween, dhallinyaro iyo guud ahaanba qaybaha bulshada.



Xafladdan waxaa bilay suugaan iyo hal-abuur murti xambaarsan oo ay goobta ku soo bandhigeen golaha abwaannada Soomaaliyeed.

“Jabuuti waa meeshii ugu horreysey geyiga Soomaalida ee laga bilaabay xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo sannadkii 2006.” “Xukuumadda Soomaaliyeed waxay isu taagtay daryeelka afka hooyo, cid kastana waxaan ugu baaqayaa inay kaalinta kaga aadan ka qaadato daryeelka afkeenna hooyo.

# Magaalooyinka Soomaalida oo Xusay Maalinta Afka Hooyo

Tiraba magaalooyin toban ka badan ayaa lagu qabtay xaflado lagu maamuusayay maalinta caalamiga ah ee afka hooyo ka dhacday. Magaalooyinka ku yaal geyiga Soomaaliyeed ee Geeska Afrika, ee xafladahani ka dhaceen waxaa ka mid aha: Jigjiga, Jabuuti, Hargaysa, Garoowe, Baydhabo iyo Muqdisho.

**(Baydhabo),** Xafladda Baydhabo waxaa ka soo qayb galay masuuliyiinta maamulka heer gobol, degmo iyo madaxda Dawlad-Goboleedka Koonfur Galbeed iyo dadweyne kale. Waxaa goobtaa ka hadlay Wasiirka Waxbarshada Hidaha iyo Tacliinta Sare ee DawladGoboleeedka Koonfur Galbeed Dr. Maxamed Abuukar Cali, wakiilka Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga AGA ee Koonfur Galbeed Prof. Maxamed Cali Kalaay, oo ka sheekeeyay sida kuu u yimid xuska maalinta afka hooyo. Sidoo kale waxa uu ka wara may dadaadka ay Akadeemiayada AGA ugu jirto daryeelka afka Soomaaliga. Munaasabadan oo ku dhacday jawi aad u wanaagsan ayaa qeyb libaax leh waxaa ka qaatey Guddoomiyaha Jaamacadda Koonfurta Soomaaliya Prof. Cabdirisaaq Xaaji Xuseen iyo qaar ka mid ah bulshada ku dhaqan Magaalada Baydhabo.

**(Garoowe),** Munaasabadda Garoowe waxaa ka soo qaybgalay madax ka kala socotay maamulka Puntland, masuuliyiin matalaysay Akadeemiye-Goboleedka AGA, wakiilo ka socday bahda waxbarshada iyo marti sharaf kale.

**(Jigjiga)** magaalada Jigjiga ee Dawlad-Deegaanka Soomaalida Itoobiya ayaa iyadana lagu qabtay munaasabad lagu maamuusayay xuska maalinta afka hooyo. khudbad ay halkaasi ka soo jeediyeen Gudoomiye ku xigeenka Jaamacadda Jigjiga Md Ilyaas Cumar, Macallin Maxamud Wakiilka AGA ee DDSI iyo bare sare Axmed Sheekh Cabdiraxmaan oo ka tirsan Akadeemiyada AGA ayaa waxay bulshada ku guubaabiyeen sidii xil gaar ah la isaga saari lahaa horumaint afka Soomaaliga iyo daryeelkiisa. Munaasabdaasi oo ku dhacday jawi aad wacan ayaa waxaa lagu soo bandhigay suugaan ay tiriyeen qaar ka mid ah abwaannada Soomaalida Itoobiya.

**(Hargeysa),** magaalada hargeysa Iyana waxaa lagu qabtay xaflad lagu maamuusayay Maalinta Caalamiga ah ee Afka hooyo. Xafladdan oo ka qabsoontay Jaamacadda Hope University (Hargaysa), waxaa ka soo qaybgalay aqoonyahanno iyo masuuliin kala duwan.

Sannad walba marka la gaaro xuska maalinta afka hooyo, Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu waxay abaabushaa munasabado la isku xusuusinayo qiimaha afka hooyo iyo hiilka uu innooga baahan yahay.

# Maalinta Afka Hooyo oo lagu Qabtay Yurub iyo Maraykan

Laamaheeda Akademiye-Goboleedka Af Soomaaliga (AGA) ayaa qaaradda Yurub iyo Maraykanka waxay ku qabteen munaasabado lagu maamuusayay maalinta caalamiga ah ee afka hooyo. Magaalooyinka ay ka dhceen xafladahani waxaa ka mid ah: Minnesota (USA), Bristol (UK), Den Haag (Netherlands), Stockholm (Sweden), Oslo (Norway) iyo Helsinki (Finland) ayaa ugu waaweynaa meelaha lagu qabtay munaasabadahaas.

**(Minnesota, USA)** Xaflad si fiican loo soo agaasimay ayaa reer Minnesota, oo uu horkacayao Macallin Siciid Saalax, ku maamuuseen maalinta Caalamiga ee Afka Hooyo.

**(Bristol, UK),** Xafladda Bristol ee wadanka Ingriiska oo la qabtay 24 Febraayo; aqoonyahannadii, qorayaashii iyo masuuliyiintii halkaas ka hadlay waxaa ka mid ahaa: Prof Cabdulqaadir Ruumi, Aamina Muuse Weheliye, Injineer Barre, Qoraa Maxamed Haykal, qoraa Khaalid Qodax, Axmed Dhagaxtuur oo ahaa iskudubbaridaha munaasabadda iyo masuuliyiin kale. Kulankan waxaa si wacan u daadihiyay Cabdi Cumar Maxamed, halka uu hadallo kooban uu af-soomaali ku jeediyey, Dimos Griziotis oo ah arday Giriig ah oo barta Afka Soomaaliga.

**(Oslo, Norway)**

Xafladda Oslo waxay ka dhacday maktabadda xaafadda Toyen, waxaana lagu soo bandhigay buugaag dhowr ah oo ku loogu tala galay carruurta ku dhalatay ama ku barbaarta qurbada. Qoraha buugtaas Ifraax Yuusuf Ciyow ayaa kula dardaarantay waalidiintii ka soo qayb galay in ay ku dadaalaan sidii ay carruurtooda u bari lahaayeen afka hooyo.

**(Stockholm),** Stockholm, Sweden waxaa lagu qabtay xaflad diiradda loogu saaray ku barbaarinta afka carruurta qurbajoogga ah ayaa waxaa laga hadlay sida ay isugu xiran yihiin afka, dhaqanka, sumadda iyo astaanta qofka ama aqoonsiga dadnimo. Aqoonyahankii halkaa ka hadlay waxaa ka mid ahaa qoraa Maxamed Xirsi Guuleed, qoraa Yuusuf Xasan, Ustaad Cabdalla Shafey, Dr. Jaamac Muuse, Macallin Nimca Nuur iyo aqoonyahanno kale. Intii ay munaasabaddu socotay waxaa barbar socday barnaamij madadaalo ah oo isugu jiray suugaan iyo ciyaaro loogu tala galay carruurta iyo waalidkaba.

**(Helsinki, Finland),** Helsinki ayaa waxaa maalintii 21 Febraayo galabnimadii lagu qabtay maktabadda dhexe barnaamij xiisa leh oo looga hadlayey afka iyo muhiimaddiisa laguna soo bandhigay buug cusub. Qorayaal, macallimiin iyo dadweyne aad u xiiseeya afka iyo suugaanta Soomaaliyeed ayaa ka soo qaybgalay. Waxaa goobta ka hadlay aqoonyahanno kale oo sheegay in dhowrkii sano ee tegey dadaal dheer loo galay sidii carruurta Soomaaliyeed loogu barbaarin lahaa afkooda hooyo in ay bartaan kuna faanaan, waxayna kula dardaarmeen waalidiinta in arrinkaa culays la saaro, iyagoo xusay in afku yahay aqoonsiga qofka.

**(Den Haag, Netherlands)**, Den Haag ayaa 23 Febraayo lagu qabtay xaflad loogu magac daray ‘War iyo Wacaal’ kuna saabsanaa afka, dhaqanka, buugta iyo suugaanta Soomaaliyeed. Waxaa ka hadlay mudane Cabdiraxmaan Abtidoon iyo Maxamed Cartan oo ka tirsan Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, gabyaa Faarax Goobdoon ayaa suugaan ku soo bandhigtay; cilmibaare Boodhari Warsame ayaa kaqeybgalayaashii la wadaagay baaritaan uu muddo sannado ah waday. Fatima Nuur oo AGA uga wakiil ah Netherlands ayaa ka hadashay muhiimadda maalintaas iyo weliba afka iyo dhaqanka soomaaliyeed in lagu baraarugo. Barnaamijka oo lagu qabtay meel tiyaatar ah ayaa wuxuu u socday qaab qurux badan uuna daadihinayey Xuseen Koofurow

# MADASHA AGA OO LAFAGUR KU SAMEYSEY BUUGGA EE HABEEN EERSI




Madal-cilmiyeed si qurux badan loo soo agaasimay laguna gorfeynayay buugga la magac baxay **'Habeen-eersi'** ee ay qortay Dayax Axmed Maxamed, ayaa 28/3/2018 lagu qabtay Magaalada Muqdisho.Madashan waxaa ka soo qaybgalay madax, marti sharaf iyo dad aad u fara badan oo ka mid ah bahda qalinleyda iyo hal-abuurka, waxaana madashaasi soo qaban-qaabiyay *Akdeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA*).

Gudoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, Dr. Maxamed Daahir Afrax oo ka hadlayay munaasabadii furitaanka madasha ayaa sheegay inuu guud ahaan bahda qalinka iyo hal-abuurka, gaar ahaanna dhallinyarada hibada leh uu ku soo dhaweynayo Madasha AGA ee loogu tala galay hiilka afka hooyo, dhiirrigalinta qorayaasha, horumarinta hal-abuurka iyo suugaanta Soomaaliyeed. waxaana uu dhinac kale iftiimiyey waxtarka weyn ee ay lafaguridda buugaagta iyo faaqidaadda suugaantu u leeyihiin horumarinta hal-abuurka iyo kobcinta aqoonta. "Waana sababta ay AGA barnaamijka lafaguridda u qabatay, xooggana u saari doonto" ayuu yiri Dr Afrax.

Waxaa Iyana goobta ka hadashay qoraagii buugga *Habeen-eersi* Dayax Axmed Maxamed, waxayna u mahadcelisay AGA oo buuggeeda u dooratay in lafagurid lagu sameeyo.

Intaasi dabadeed waxaa la guda galay lafagurkii buugga, waxaana halkaasi gorfayntooda ku soo bandhigay xeeldheerayaasha soo akhriyay buugga, lafaguriddana ku soo sameeyay, kala ah Prof. Mustafa C/llaahi Fayruus, Ustaad C/laahi Shiikh Cabdi (Gacanka), Saynab Xaaji Axmed iyo Abwaan Salaad C/lle Cabdi.

Qaar ka mid ahaa ka qeybgalayaashii madashaasi oo cabirayay dareenkooda ayaa sheegay inay ku faraxsan yihiin qaabka ay AGA u soo abaabushay madashaasi, waxaana ay codsadeen in la joogteeyo.

Gabagabadii madasha waxaa ka hadlay Agaasimaha Waaxda Wacyigalinta iyo Hal-abuurka Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isbortiga, Md Maxamed Cali Cilmi (Gaagaale) iyo Kusimaha Gudoomiyaha Golaha Abwaanda Somaaliyeed Abwaan Xirsi Dhuux Maxamed oo hambalyeeyay qabashada madashaasi lagu lafagurayay buugga Habeen-eersi.

Madasha AGA oo ah madal Bille ah ayaa si joogtaysan waxaa ugu kulma bahda Akadeemiyada, ehelada AfSoomaaliga iyo suugaantiisa, bahda Dhaqanka iyo aqoon-faafinta, bahda Waxbarashada iyo cilmi-baarista, bahda Warbaahinta iyo guud ahaan inta ku hawlan afka iyo hal-abuurkiisa; waxaana si gaar ah uga faa`iidaysta da`yarta xiiseeya akhriska iyo qoraalka, xubnaha naadiyada dhallinyarada iyo ardayda jaamacadaha.

# AGA oo dhallinyaro u Qabatay tababar ah Habaynta Qoraalka

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA) ayaa dhallinyaro ka tirsan naadiyada akhriska iyo qoraalka tababbar ugu qabatay 28/2/2018 Hotel Furaat ee Magaalada Muqdisho, Tababbarkan oo ku saabsanaa Habaynta Qoraalka ayaa waxaa ka faa'iidaystay in ka badan 50 dhallinyaro ah.



Gudoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga Dr. Maxamed Daahir Afrax oo si rasmi ah u furay tababarkaasi ayaa sheegay inuu ku faraxsan yahay sida ay naadiyada akhriska iyo qoraalku ugu heelan yihiin barashada qurxinta qoraalka, waxaana uu carrabka ku dhuftay inuu soo dhaweynayo da' yarta hibada u leh hal-abuurnimada. Sidoo kale waxaa goobta ka hadashay Farxiya Muxyadiin (Lama-filaan) oo ku hadlaysay magaca ka qeybgalayaasha tababbarkaasi, waxaana ay balanqaaday casharada ay halkaasi ka qaataan inay ku dabaqi doonaan qoraaladooda, iyadoo u mahadcelisay Akadeemiyada AGA oo tabarbarkaasi soo qabanqaabisay. Casharrada tababarka waxaa bixinayay Prof. Mustafa Fayruus iyo ustaad Cabdulaahi Sheekh Cabdi (Gacanka).

**"Afkaagu Waa Aqoonsigaaga"**

# WARAR KALE OO XUSID MUDAN

## SomaliPen oo xus iyo xusuus u samaysay qoraa Cabdiraxmaan Xuseen Samatar




Naadiga hal-abuurka iyo qalinleyda Soomaaliyeed (Somali Pen) xafiiskiisa Muqdisho ayaa xaflad xus iyo xusuus ah u sameeyay marxuum Cabdiraxmaan Xuseen Samatar 15/3/2018, oo dhowaan ku geeriyooday magaalada nayroobi Kenya.

Munaasabadii xuskaasi oo uu soo qaban-qaabiyay Naadiga Hal-abuurka iyo Qalinleyda Soomaaliyeed (Somalipen) ayaa waxaa goob joog ka ahaa madax kala duwan, aqoonyahano, culumaa'udiin, qurbajoog, dhallinyaro iyo haween munaasabadaasi lagu casuumay. Sidoo kale, Munaasabaddan baroordiiqda ah waxaa ka qayngalay Musuuliyiin ka tirsan Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga AGA. Waxaa xuskan lagu soo bandhigay tariikh nololeedkii, shaqooyinkii uu soo qabtay, waxqabadkii, buuggaagtii uu qorey iyo dar-daarankii uu ka tagey qoraagaasi.

Qoraa Cabdiraxmaan Xuseen Samatar oo 4/3/2018 ku geeriyooday Dalka Kenya ayaa lagu tilmaamaa inuu ka mid yahay qorayaasha Soomaaliya ugu buuggaagta badan, Buugggaagta uu qoray oo ka kooban 44-buug ayaa waxay isugu jiraan qaar uu ku qorey luqadda Carabiga iyo kuwo uu ku daabacay Afka Soomaaliga iyo Ingiriisiga.

## Xarunta IFIYE oo Shaacisay Natiijadii 'Tartan-Sheeko 2018'




Xarunta IFIYE ayaa shaacisay 17/3/2018 natiijadii 'Tartan-Sheeko 2018' oo xaruntani qabanqaabisay.

kaalinta 1aad waxaa ku guulasytay Nasra Cali Nuux oo qortay sheekada "Quudhsi Aan Qiil Lahayn!". Kaalinta 2aad waxaa galay Cabdiraxmaan Cabdilaahi Xasan, oo qoray sheekada "Welwelkii Ladan!". kaalinta 3aad waxaa ku guulaystay Sadiiq Axmed Ciise, oo qoray sheekada "Qoyskii Qurxoonaa!".

Tartan-sheeko waa tallaabo bogaadin mudan, oo kobcinaysa hal-abuurka iyo qoraalka.

## Maktabadda Qaranka oo Dib loo Hawlgeliyay



Tallaabo bogaadin mudan, waxaa dib loo hawlgeliyay 19/4/2018 Maktabadda Qaranka oo ku taal Muqdisho, waxaana xarigga ka jaray Ra`iisalWasaaraha Soomaaliya md Xasan Cali Khayre. Maktabadda Qaranku waxay shaqadeeda bilowday 1983, waxayse joogsatay 1991. Xilligan waxaa dib loo hawlgeliyay qayb ka mid ah maktabadda. Maktabaduhu waxay qayb ka yihiin kordhinta aqoonta iyo kaydka cilmiga. Munaasabaddan Maktabadda Qaranka lagu furayay waxaa goobjoog ka ahaa masuuliin kala duwan, bahda waxbarashada iyo waxgarad kale.

**"Afkaagu Waa Aqoonsigaaga"**

KORORSO AQOONTA AKAAGA IYO HAL ABUURKIISA

# Dhismaha Naxwaha Af Somaaliga.

## Magacyada.

Wadaraynta magacyada Af-Soomaaliga ku jira.
Magacyada Af-Soomaaliga ku jiraa afar qaab ayey wadar ku noqon karaan, iyada oo mar walba la raacayo xeerarka nawe ahaan loogu dejiyey mid walba.
Xeer naxwe.
1-Magayada wadarta ah waxaa gadaal looga dhejiyaa xarfaha kala ah:
(O),( YO), (Oyin) ama (Yaal) midkood.
2-Magacyada hal alanle ah, oo shibbanaha ugu dambeeya la laban laabo.
a-Waxaana sharddi ah in loo dhexaysiiyo, labada shibbane shaqalka (a).
3-Magacyada codkaca keliya lagu kala sooco labka iyo dheddigga.
4- wadaraynta magacyo jacbur ah oo Af-Soomaaliyoobay.
Magacyada dheddig oo isu beddela magacyo lab ah.
Waxaa jira 8 nooc oo magacyadu dheddig iyo lab isugu beddelaan,
waxaana ka mid ah:
Nooca 1aad.
Xeer naxwe.

1. Waxaa jira magacyo marka ay kelida yihiin dheddig ah , oo markii ay wadar noqdaan lab isu beddela.
2. Magacyadaas qaarkood ,si ay wadar ku noqdaan waxaa gadaal looga dhejiyaa xarafka (O). 3.Kuwa ku dhammaada xarafka (i)na, si ay wadar ku noqdaan waxaa gadaal loogu dhejiyaa xarfaha (YO). 4.Magaca kelida ah oo xarafka (n) ku dhammaada (Ndu)waxay isu beddeshaa xarafka (m). 5. Xarafka (O) marka lagu dhejiyo qodobka,wuxuu isu beddeshaa (a).

**Shax muujinaysa Nooca 1aad.**

| Magac dhedig oo keliya | Qodob dheddig | Magac lab ah oo wadar ah | QodobLab ah |
|---|---|---|---|
| 1.Kab | Kab=ta | Kabaha (o ku beddel( a). | ha |
| 2.irbad | Irbad-da | Irbada=ha (o beddel a) | ha |
| 3.qolof | Qolof=ta | Qolfa=ha | ha |
| 4.galab | ta | Galba=ha | ha |
| 5.gacan | Gacan=ta | Gacma=ha (n-bedel ma) | ha |
| 6.mindi | Mindi=da | Mindiya=ha | ha |
| 7. bar | Bar=ta | Bara=ha | ha |
| 8.far | Far=ta | Fara=ha | ha |
| 9.war | War=ta | Wara=ha | ha |
| 10.laf | Laf=ta | Lafa=ha | ha |
| 11.bir | Bir=ta | Bira=ha. | ha |
| 12.lug | Lug=ta | Luga=ha | ha |
| 13.dheg | Dheg=ta | Dhega=ha | ha |
| 14.bil | bisha | Bila=ha | ha |
| 15. bad | Bad=da | Bada=ha | ha |
| 16.feer | Feer=ta | Feera=ha | ha |
| 17 tin | Tin=ta | Tima=ha | ha |
| 18.koor | Koor=ta | Koora=ha | ha |
| 19.beer | Beer=ta | Beera=ha | ha |
| 20.hees | Hees=ta | Heesa=ha | ha |

**Nooca 2aad .**

Xeerarka nawxaha oo la raacayo,waxaa ka mid ah:
1-.Magaca kelida ahi waa in uu magac dheddig ahaadaa.
2-Waa in uu marka uu wadar noqdo isu beddelaa magac lab ah.
3-Waa in magacyda dheddig oo kelida ahi ay ku dhammaadaan xarafka (o). 4. Magacyada wadarta ahina waa in ay gadaal ka raacaan xarafaha (oyin).

**W. D. Cabdullaahi Maxamed Sheegow**

“Afkaagu Waa Aqoonsigaaga”

# *WAA MAXAY SUUGAAN?.*

*Inta aynaan u gelin su'aasha ah waa maxay suugaan? Marka hore aan is yara dultaagno iftiiminta ereyga Suugaan macnafurka asalkiisii hore waxay u adeegsan jireen Soomaalidii hore. Ereyga Suugaan ma aha erey cusub oo waa soo jireen filweyn. Waana erey lahaa macnayaal kala duwan, looga kala adeegsan jirey geyiga soomaaliyeed, oo wey ku kala geddisnaayeen degaannadu isticmaalkiisa ereyeed. Inkastoo nuxur ahaan ay isugu macna dhowaayeen waxyaabaha ay u kala adeegsan jireen.*

*Tusaale ahaan degaannada qaarkood Suugaan waxaa looga yaqaanney dhulka meesha tigaadowday magoolka dhirta marka meel fog laga soo jeedaaliyo midabka madowgee ay yeelato, muuqaalka ugbaadkeeda. Waa tey oran jirtey sahan ilaaleeyey ama socoto soo aragtey meel heblaayo suugaan baa ku taal.*
*Degaannada qaarkoodna waxay u yaqaanneen, xilliga jiilaalka dheeraado oo uu dhulka daaqu ka idlaado. Meelaha cows ku harka ah, godimada biya qabadka leh sida: Waadiyada, dooxooyinka, toggaga iwm. Ee ay xoolaleydu isugu soo ururaan. Waxaa la oran jirey geel reer hebel meel heblaayuu suugaan ka daaqayaa. Sidoo kale degaannada qaarkood waxaa looga yaqaanney hadalka aan si fiican loo garin Karin ujeeddadiisa ee gunuunaca ah. Ninkii maahmaahey waa tuu yiri: ''Hilib sooryo maaha, doqoni sokeeya maaha, Suugaani hadal maaha''. Sidoo kale degaannada qaarkood Suugaan waxaa looga yaqaanney uduga saxansaxada roobka. Halka degaannada qaarkoodna looga wax yar. Isku soo wada duuboo macnayowgaa kala geddisan nuxur ahaanse aan kala fogeyn ayaa loo yaqaanney Suugaan oo loo adeegsan jirey.*

*Waxaa leys weydiin karaa, oo maangal ah. Haddii Suugaan sidaa loo aqoon jirey maxaa ka salguuriyey macnayowgii horey loogu adeegsan jirey ee ku sidkey waxa maanta loo yaqaanno Suugaan.ee ay caanka ku tahay Tusaale ahaan waqtigan aynu joogno, qof waliba oo Soomaaliyeedoo qaangaar ahi, marka ay dhegtiisu ku soo dhacdo Suugaan maqalkeeda durba wuu gartaa waxa ku soo maqan ee laga hadli doono iney tahay halabuurka iyo jaadadkiisa Sida gabay, geeraar, masafo, jiifto, hees, buraanbur iwm. Haddaba is weydiinta su'aashaa aan soo tiraabey ee kor ku xusan. Innagoon meel dheer u doonin jawaabteeda. Qoridii Af-Soomaaliga markii far loo yeeley dhigaalkiisa. Waxaa xigey taabagelinta manhaj ku saleynta afka hooyo waxbarashada aasaasiga ah ee dalka. Haddaba si loo kobciyo afka hooyo waxaa la sameeyey erey bixintii ugu badneyd goortaa oo lagu dejiyey manhaj dhammeystiran oo loo diyaariyey ubadka soomaaliyeed si ay afkooda hooyo wax ugu bartaan. Dabadeedna laga hirgeliyey dalka oo dhan. Haddaba xilligaa diyaarintii maadada Af-Soomaaliga halabuurkiisa ayaa Suugaan loogu magac bixiyey iney noqoto erey kooba laamaha kala duwan ee halabuurka afka hooyo. Sidaana looga dhaqangeliyey guud ahaan dalka. Waana tan keentey maanta marka ay dhegtaadu ku soo dhacdo Suugaan durba inaad dareento waxa laga hadli rabaa iney tahay halabuurka laamihiisa kala duwan tix iyo tiraab key doonta ha noqotee.*

*Haddaan u soo noqdo jawaabta su'aashii aheyd waa maxay suugaan? Inkastoo aaney jirin Suugaan qeexid go'an oo biya kama dhibcaan ah oo la leysku raacsan yahay oo la siiyey loo asteyn weli saleynteeda. Haddana marka aan u dhabagalno fasiraadaha kala duwane ay siiyeen qeexida Suugaan xeeldheerayaasha aqoonta durugsan u leh ee u go'doomey cilmibaaristeeda. Waa kuwo aad isugu dhow nuxur ahaan marka loo eego, balse farqiga u dhaxeeya uu yahay weer dhigaalka qeexidooda ereyada ay u kala adeegsadeen uun bey ku kala geddisan yihiin. Hadaba marka leysku soo xeeriyo Suugaan waxaan ku qeexi karnaa sida soo socota:*

*''Suugaan waa hadal aftahammo ku dhisan oo duluc shisha leh. Oo loo yiri si heemaal qurux badan oo farshaxannimo leh. Habdhac iyo miisaan sargooya leh oo ka duwa hadalka caadiga ah. Dhegtuna jecleysato oo aaney ka xiisa goyn''. Si kale haddaan u dhaho Suugaaan waa iidaanka hadalka bila.*

***Jaadadka Suugaanta.***

*Qaabdhismeedka Suugaanta Soomaalida dul ahaan rukumada gundhiga u ah, ee ay magac dallaalimeyso Suugaantu, waxay ka kooban tahay laba qaybood oo kala ah:*

1. *Tix {Halabuurka Maansada}.*
2. *Tiraab {Halabuurka fan qoraaleedka}*

***Tix {halabuurka Maansada}.***

*Tix waa magac inoo sifeeya habsameysanka halabuurka Maansada laamaha ay ka kooban tahay meeriseyntooda. Tusaale ahaan waxaan maqalnaa had iyo jeeraale marka la magacdhabayo jaad kasta oo ka mid ah laamaha Maansada in horgale looga dhigo Tix sida: tix gabay ah oo uu mariyey hebel, tix geeraara oo sidaa... iyo sidaa... ah, tix masafo ah, ama tix jiifto ah, iwm.*

*Waxaa leys weydiin karaa, sidee bey Tixdu u tusmeysaa habsameysanka Maansada jaadadkeeda haltirineed?. Haddaan iftiimiyo su'aashaa jawaabteeda. Ereyga Tix asal ahaan jiraalkiisa wuxuu ka soo dhanbalmey erey faleedka tixid. Sida aan wada ognahay erey waliba wuxuu ka kooban yahay ama ka abuurmaa xubno leysu geeyey. Xubinle waa erey ka kooban hal shibbane iyo hal shaqal. Sida: il, af, bad, buur, baal far, lug iwm. Dhammaan ereyadaa aan soo xusey waa hal allanle ama hal xubinlayaal. Haddaba erey faleedka tixid wuxuu ka kooban yahay laba xubnood oo kala ah: **tix iyo id,** sidaa daadeed Tix waa jirrida erey faleedka tixid, oo inoo sheega howl qabasho wax la taxayo oo u baahan ka fiirsasho iyo taxadar dheeraad ebyidooda.*
*7-Tusaale ahaan tusbaxlaha haddaan ka shidaal qaadano. Marka uu Tusbax sameynayo, wuxuu u maraa dhowr marxaladood, marka hore wuxuu soohaa dunta. Kadib wuxuu doortaa nooca midabka Tusbaxa uu sameynayo madow, casaan iwm. Haddana wuxuu dooortaa dhumucda tusbaxa uu doonaaya inuu sameeyo cabbirkiisa. Maadaama iniinaha Tusbaxa laga sameeyo cabbir ahaan ay kala waaweyn yihiin. Intaa markuu isku habeeyo ayuu wuxuu bilaabaa tixida tusbaxa. Wuxuu mirtaa hadba midabka iyo dhumucda iniinaha uu u xushey inuu ka sameeyo Tusbaxa. Dabadeedna hal hal ayuu u geliya dunta illaa uu ka ebyo sidaa ayuu ku wadaa tixidiisa. Haddaba Tix waxay magaceysaa erey faleedka tixid. Marka aan u soo noqdo Maansada waxay iyana u sameysantaa hab xarafraac ereyo taxma. Sidaasey haddaba Tix magac sifeeya ugu noqotey habsameysankeeda Maansada.*

**W/D Cabdulaahi Cabdi Aadan (Gacanka )**
**E-Mail: gacankalfle@gmail.com**

# MURTI: HODANTINIMADA AFKAAGA HOOYO

# MURTIDA WARSIDAHA

**W/D Cabdi Naasir Yuusuf Macalin Xuseen**

MURTI

**Saddex wax ee lama huraanka, u ah waxkasta oo qiio leh.**

1- Howlkarnimo
2- Adkeysi iyo
3- Garaad fiican

Xikmad Qaali ah

**Wan iyo laba nin sheeko dhexmartay**

Laba nin ayaa isdagaashay wan agtaagnaa ayaa yiri" war labada nin halakala celiyo,
ninkale ayaa yiri"war maxaa kaa galay haday isdagaalaan, wankii ayaa ku jawaabay "hadhow ayaad la dhihi doonaa " wan halagu baaniyo oo ley qali doonaa ".

**Xikmad**

Waxaa jirta xikmad shiineys ah oo tiraahda "akhrisku waxa uu caqliga uga dhiganyahay sida jimicsiga uu jidhka uga dhiganyahay".

Dardaaran wanaagsan

Hadii aadagto qof aad jeceshahay, dhoolacadee, wuxuu dareemayaa jaceylkaada.
Hadii aad aragto cadawgaada ,dhoolacadee wuxuu dareemayaa awoodaada.
Hadii aad aragto qof kaa maarmay, dhoolacadee wuxuu dareemi doonaa qoomamo(shalayto).
Hadii aad aragto cidaadan garaneynin dhoolacadee waxaad helleysaa ajar.
waxaan ka soo dheegtay Dr ibraahim (fiQi).

**Afar qiimahooda waxaa og afar**

1) Dhalinyaranimo Qiimaheeda waxaa og Waayeelnimo.
2) Nabad Qiimaheeda waxaa og Colaad
3) Fayoobi qiimaheeda waxaa og Cudur.
4) Nolol qiimaheeda waxaa og Geeri.

**Afar la iskuma daro**

1) Waan guuri
2) Waan guursan
3) Geelbaan Qalan
4) iyo Geenyaan gadan .

**Saddex caqligu wuu ku koraa**

1) Fekerka iyo Fiirsiga
2) Akhriska badan
3) iyo Sbadalada Waqtiga

**Saddex ku celcelinta waa ku fududaadaan**

1) Salaadda
2) Qudbada
3) iyo Wax qoridda

**LIX AYAA SAAXIIBKA LAGU XUSHAA**

1) Waa inuu caaqilyahay,
2) Waa inuu dabeecad wanaagsan yahay
3) Waa inuu qof suuban yahay .
4) Waa inuu san hawo badneyn oo aduunya jecleyn
5) Waa inuu aakhiro jecelyahay.
6} Waa in uu Runlow yahay

**Sideed Waxaa lagu Xushaa Hoggaamiyaha**

**1- In uu Diin leeyahay**
**2- In uu deeqsi yahay**
**3- In uu sharaf leeyahay**
**4- In uu Dulqaad badan yahay**
**5- In uu samir badan yahay**
**6- In uu kibir badneyn**
**7- In uu Geesi yahay iyo**
**8- In uu Dhawrsoon yahay**

## ORAAH IYO HAL KU DHIG

**Ummad aan Qoraal lahayn waa Geedi aan sahan lahayn**
( Waa Oraah l uu yiri, Madaxweynaha jamhuuriyadda jabuuti Ismaaciil Cumar geele)

**Aqool Xumo Abaar ka daran**
Waa Maahmaah Soomaaliyeed oo ka tarjumeysa in waxa aad heysto oo si Xun u Maamusho in ay ka daran yihiin adigoo aan heysan .

**Oraah**
Awooda hadalka Maaha in aad isaga hadasho wax walba oo afkaaga qabto , waa in aad ka hadasho wax walba oo waxyeelo keeni kara (U hadal si Xurmo leh)

**Oraah**
Adduunku waa Buug, qofkii aan Dhul marina Bog kaliya ayuu ka akhriyey
Dadku Hadalka ayuu isku Gartaa, Xooluhuna Urta ayey isku gartaan.
Dadka Sharcigaa kala celiya , Xoolahana Usha ayaa kala celisa

**Oraah**
Noqo qof ay taariikhdu Xusto ee ha noqon kaliya qof Taariikhaha Xusa
Han iyo Himilo

**Oraah**
Ha ka Cabsan Caddowga u soo bareerey in uu ku soo weeraro, laakiin iska Ilaali Saaxiibka beenta ah ee Hab ku siiya

## MAAHMAAH

1- Hadal nin si u yiri , Nina si u qaadey
2- Agoon kori, ugana Dhaaro in aadan aabihii Dilin
3- Gacmo Wadajir bay wax ku gooyaan
4- Gacmo is dhaafey ayey Gacalo ku jirtaa
5- Hadal aan Fiiro loo oran, Caano aan Fiiqsi loo dhamin Feeraha ayey waxyeelaan
6- Ilko iyo Run Waa la cadeeyaa
7- Biyo Sacabadaadaa looga Dhergaa
8- Af aadan lahayn lama qabto
9- Ari been waa didaa, Beense uma Dhutiyo
10- 10-Booraan hadimo ha Qodin , hadaad Qodana ha dheereen ku Dhici doontaa lama oga .

**BARO AFKAAGA BARNA UBADKAAGA**

# "Afkaagu Waa Aqoonsigaaga"

# "U HIILLI AFKAAGA HOOYO"

## Himilada AGA

**(*vision*)**

**Af Soomaaliga oo halista ka badbaada,**
**adeegsigiisa la xoojiyo lana saxo,**
**laga dhigto nabad-side walaaleeya Soomaalida**
**iyo idil ahaanba ummadaha Geeska Afrika.**

## Hawlgalka AGA

**(*Mission*)**

**Waa ilaalinta afka hooyo,**
**iba-furka hal-abuurkiisa iyo turxaan-bixinta adeegsigiisa, qoraal iyo qawlba;**
**iyo inuu Af-Soomaaligu noqdo afka rasmiga ah ee maamulka iyo waxbarashada geyiga Soomaalida.**

## Hadafka AGA

## (Main *objectives*)

- Daboolid baahida loo qabo madal kulmisa, dhiirrigalisa, kana miradhalisa waxqabadka dadka Soomaaliyeed ee Geeska Afrika iyo daafaha dunida ee waxtarka u leh daryeelka AfSoomaaliga iyo hal-abuurkiisa.
- Ka wacyi-galin ummad-weynta Soomaaliyeed qiimaha afkoodu ugu fadhiyo, halista ku soo fool yeelatay iyo baahida uu u qabo gurmad wadajir ah.
- U hawlgalid iyo dhiirrigalin cilmi-baaris dhinacyada kala duwan ee afka iyo hal-abuurkiisa.
- Dhiirrigalinta akhriska iyo Kobcinta iyo hagidda da'da soo koraysa ee hibada u leh qoraalka iyo hal-abuurka loo adeegsanayo afka hooyo.

